TENANTS UNION of Victoria Ltd

Tusahaaga tallaabo tallaabada ah ee soo ceshadka debaajiga

Maajo 2010

KA BILOW HALKAN

Waad guurtay waxaanad dooneysaa debaajigaaga in laguu soo celiyo.

Mulkiilahaagu ma wax buu ku sheeganayaa debaajigaaga?

MAYA

Foomamka Dalabka Debaajiga iyo Maxkamada (VCAT) foomamka codsiga waxaa laga helayaa Arimaha Isticmaalayaasha Fiktooriya iyo Ururka Kireystayaasha Fiktooriya (Tenants Union of Victoria)

Adiga iyo mulkiilahaagu/wakiilkaaga waa inaad buuxisaan oo saxiixdaan Foomka Dalabka Debaajiga.

Waa inaad hubisaan Caddadka $ in lagu buuxiyo ka hor intaadan saxiixin!

U dir foomka Hay'ada debaajiga Kireystayaasha Degaanka (ka eeg cinwaanka foomka).

Debaajigaaga ma waxaa bixiyey Xafiiska Guryaha oo hoos imanaya qorshaha deynta debaajiga (bond loan scheme?)

MAYA

Debaajigaaga waxaa lagugu soo shubi doonaa xisaabta bangiga ee aad sheegatay ama waxaa loo soo dirayaa cinwaankaaga maalinta ka danbeysa marka laga shaqeeyo foomka Dalabka debaajiga.

HAA

Debaajiga waxaa si toos ah loo siin doonaa Xafiiska Guriyeynta.

HAA

Ma ku raacsan tahay mulkiilahaaga/wakiilkaaga waxa ku saabsan inta caddad debaaji ah ee ay helayaan?

MAYA

Mulkiilahaagu waa inuu dalbadaa Maxkamada 10 maalmood oo shaqo gudahood ee kireysigaaga si uu ugu sameeyo dalbasho debaajigaaga. Waxaad ka heli doontaa nuqulka codsiga iyo Ogeysiinta Maxkamadu (Notice of Hearing) markay dhacayso Maxkamada. Haddii 10 maalmood oo shaqo la dhaafo mulkiiluhu wixii ka danbeeya kuma sameyn karo dalbasho debaajigaaga ilaa ay maxkamadu wakhtiga u kordhiso mooyaane.

Waxaad dalban kartaa maxkamada xagga soo celinta debaajigaaga wakhti kasta ka dib marka kireysigaagu uu dhammaado.

Buuxi oo u dir Codsiga Kireystaha 'Application by a Tenant' Maxkamada Maamulka iyo Madaniga Fiktooriya, liiska Kireystayaasha degaanka. Ma jirto wax ujro lacageed ah ee codsiga soo ceshadka debaajiga.

Waa maxay macluumaadka aad keenayso Maxkamada:
- > Taariikhdii aad bilowday kireysiga
- > Nooca kireysiga (waxaa loola jeedaa xilliga go'an, bil bilaha ah)
- > Caddadka debaajiga ee la bixiyey
- > Nuqulka caddeynta debaajigaaga
- > Inta ogeysiis ah ee la bixiyey
- > Warbixinta Xaallada haddii aad mid heysato

HAA

Adiga iyo mulkiilahaaga/wakiilka waa inaad buuxisaan oo saxiixdaan foomka dalbashada debaajiga (Bond Claim form), idinkoo caddeynaya inta debaaji ah ee midkiinba la siinayo.

Ha saxiixin foomkan debaajiga oo bannaan.

Debaajigaaga ma waxaa bixiyey Xafiiska Guriyeynta (Office of Housing?)

HAA

Kuma raaci kartid in qayb ka mid ah debaajiga in la siiyo mulkiilaha. Waxba ha sameynin: mulkiiluhu waa inuu dalbadaa Victorian Civil and Administrative Tribunal (VCAT).

MAYA

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan difaacida dalabka mulkiilaha ee debaajigaaga, ka eeg warqadaha xaqiiqda:
- > **Debaajiyada (*Bonds*)**
- > **Difaacida dalabka magdhowga (*Defending a compensation claim*)**